

Waalidka Highland,

Waxaan ku faraxsannahay inay ardaydu heleyaan fursad ay iskuulka ku yimaaddaan iyada oo jadwalkooda wax laga baddalayo laga billaabo Arbacada, 14-ka Abriil. Idinka iyo ardayda waxaan idiin soo diraynaa warbixinno si aan u go'aaminno arrintan. Waxaan idinku martiqaadayaa 2 kulan oo waalidka hawada online loogu qabanayo si aad wax uga ogaataan dib-u-furidda iskuulada bisha Abriil 14-keeda. Waa kuwan taariikhaha iyo saacadaha oo Google Meet lagu kulmayo:

Waxaa la kulmayaa maalmaha kala ah 10-ka Maarso iyo 24-ka Maarso, iyo saacadda 6:00-da galabnimo. Luuqadaha Inigiriiska, Isbaanishka iyo Soomaaliga ayaa kulamo kala duwan lagu qabanayaa. Warbixin ayaa la idinla wadaagayaa, ka dibna fursad su'aalo iyo jawaabo ahna waad heli doontaan. Halkan baa laga galayaa kulamada:

The Google Meet Code for English is: meet.google.com/see-fgci-wfe

The Google Meet Code for Spanish is: meet.google.com/knz-njbf-oxy

The Google Meet Code for Somali is: meet.google.com/tji-qvwx-foy

Fadlan, fiiri macluumaadka hoos ku qoran uu horay deegaanka Iskuulada St. Paul idiinku soo diray.

Virtual Learning Waxbarashada Durugsan

Ardayda fasallada 6-aad ilaa 12-aad oo raba inay si buuxda u dhigtaan waxbarashada durugsan oo online hawada ah inta sannadka ka hadhay, waa inaad halkan ka buuxisaan ugu dambayn Khamiista, 11-ka Maarso (Riix): [sign up by Thursday, March 11](#). Haddii aad carruurtaada horay ugu buuxisay Iskuulka Online (Virtual Learning School) ama aad ka reebtay inay iskuulka too u yimaaddaan, waa inaad arjigan mar kale buuxisid sii ay u sii wataan waxbarashada durugsan (virtual learning). **Go'aankan wuxuu socon doonaa ilaa dhammaadka sannad dugsiyeedkan. Ardayda aan isku qorin iskuulka online-ka ah oo idil, waxaa la diiwaangelinayaa inay iskuulka toos u yimaaddaa (in-person) oo billaabanaya 14-ka Abriil.**

Waad ku maahadsantihiin taageeradiinna Iskuulka Highland Park Senior High School iyo Iskuulada Dadweynaha ee Saint Paul.

Dr. Winston H. Tucker
Maamulaha